IIB MA GALO

# FAAFINTA RASMIGA AH

# الجريدة الرسمية

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

لجمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 7aad    Muqdisho 18 Juunyo 1979 L. 2 R 6

**Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J.D.S.**

**FAAFINTA BIL SOO BAXA** جريدة شهرية

**QIIMUHU:** waa 5 Shilin lambar waliba **RUKUNKA:** Sanadkii waa Sh. 100 Soomaaliya guduheeda — dibadeedana waa Shs. 300. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilaabmaa 1 Janaayo Qiimaha qoritaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weeydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lagagta

## KOOBNIIN

QAYBTA KOOWAAD

SHAHRCI

SHARCI L. 22 ee 10 Maajo 1979, Toosin iyo wax ku kordhin qodobo Sharciga L. yahay 21 Taar tahay 3.2.1977 oo ku saabsan Gobollada iyo Degmooyinka..

**QAYBTA LABAAD**

M.W.

QAYBTA 3AAD

TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR 15 Abriil 1979 Lumid B. Kayd L. 2339 L. 381

## QAYBTA 1AAD
## S H A R C I

SHARCI L. 22 ee 10 Maajo 79, Toosin iyo wax ku kordhin qodobo Sharciga Lamb. 21 ee Taariikh 3.2. 77 oo ku saabsan Gobollada iyo Degmooyinka.-

### M A D A X W E Y N A H A J.D.S.

ISAGOO arkay: Xaashida 1aad tan 2aad iyo tan 3aad ee kacaankii 21ka Oktoobar 1969;

ISAGOO arkay: Sharciga lambar 17, 18, iyo 19 ee 1.7.1976;

ISAGOO arkay: Oggolaanshaha Guddiga Siyaasadda iyo Golaha Wasiirada;

Wuxuu soo saaray:

Shariiga soo socda:

### Qodobka 1aad

Guddoomiyaha Guddiga Maamulka ee Gobolka Lambarka 2aad ee qodobka 9aad ee sharciga lambarkiisu yahay 21, soo baxay 3.2.1977 waxaa loo toosiyey sida soo socota:

Guddoomiyuhu waa Wakiilka Dawladda Dhexe ugu qeybsan maamulka Gobolka oo dhan, wuxuu mas'uul u yahay Madaxweynaha J.D.S. wuxuuna toos ula xiriiraa ulana shaqeeyaa Madaxweynaha J.D.S. wixii ka baxsan maamulka oo si toos ah ugula xiriirayo ugalana shaqeeynayo Wasiirka Dawladaha Hoose iyo horumarinta Miyiga, oo uu ka qaadanayo awaamiirta iyo tilmaamaha hawlmaalmeedka la xiriira maamulka guud ee Gobolka iyo fulinta mashaariicda, hase yeeshee wuxuu kala xiriiri karaa Wasaarad kasta iyo Hay'ad walba wixii iyada gaar u saameeya.

### Qodobka 2aad

### Isuduwaha Dwaladaha Hoose

Qodobka 10aad ee sharciga xaggan sare ku sheegan (sharci lambar 21 ee 3.2.1977 waxaa loo beddelay sida soo socota:

1. Isuduwaha Dawladaha Hoose ee Gobolku waa Wakiilka Wasaaradda Dawladaha Hoose iyo Horumarinta Miyiga waxaana magacaabaya Wasiirka Dawladaha Hoose iyo Horumarinta Miyiga;

b) Isuduwuhu wuxuu kormeeraa oo mideeyaana, Laamaha Dawladda Hoose ee Gobolkiisa oo dhan, iyo shaqaalahooda; wuxuuna darsaa, talana ka bixiyaa iskudubbariddidda Miisaaniyadaha Dawladaha Hoose iyo Arrimaha Dhaqaalaha ee Gobolka;

t) Wuxuu kala xiriiraa Guddiga Maamulka ee Gobolka oo uu ka qaadanayo awaamiirta shaqo maalmeedka hase yeeshee wuxuu mas'uul uga yahay Wasaaradda Dawladaha Hoose iyo Horumarinta Miyiga wixii ku saabsan farsamada maamulka;

### Qodobka 3aad

Guddoomiyaha Guddiga Maamulka ee Degmada

Lambarka labaad ee qodobka 12aad (2) ee sharciga lambarkiisu yahay 21 ee 3.2.1977 waxaa loo toosiyey sida soo socota:

a) Guddoomiyuhu waa Wakiilka Dawladda Dhexe ugu qaybsan maamulka Degmada oo dhan, wuxuuna mas'uul u yahay Madaxweynaha J.D.S., wuxuuna toos ula xiriiraa ulana shaqeeyaa Guddiga Maamulka ee Gobolka oo uu ka qaadanayo tilmaamaha maamulka guud ee Degmada iyo fulinta mashaariicda, hase yeeshee wuu kala xiriiri karaa Madaxda laamaha Wasaarad walba iyo Hay'ad kasta ee Gobolka wixii iyada gaar u saameeya.

Wasiirka Dawladaha Hoose iyo Horumarinta Miyiga si toos ah ayuu u siin karaa Guddiga Maamulka Degmada awaamiir ku saabsan maamulka guud ee Degmada.

### Qodobka 4aad

### Maamulka Dawladda Hoose

Qodobka 13aad ee sharciga kod ku sheegan waxaa loo beddelay sida hoos ku qoran:

Degmada kasta yaxay yeelaneysaa Maamule Dawladda Hoose iyo Horumarinta Miyiga oo uu magacaabo Wasiirka Wasaaradda Dawladaha Hoose iyo Horumarinta Miyiga, wuxuuna toos ula xiriiraa Guddiga Maamulka Degmada xagga shaqo maalmeedka, hase yeeshee wixii ku saabsan hawlaha farsamada maamulka wuxuu kala xiriiraa Isuduwaha Dawladaha Hoose iyo Waaxyaha Wasaaradda.

Gaar ahaan wuxuu mas'uul ka yahay

b) Fulinta sharciyada u degsan Maamulka Dawladaha Hoose iyo awaamiirta Guddiga Maamulka ee Degmada;

t) Habeynta Miisaaniyadda Dawladaha Hoose iyo gurista canshuuraha Dawladaha Hoose;

j) Xafidaadda iyo ilaalinta kharashka iyo dakhliga Miisaaniyadda iyo maamulka kale ee Dawladda Hoose;

x) Hirgelinta mashaariicda;

kh) Wuxuu ka qayb galaa fulinta, fidinta iyo ballaarinta barnaamijka J.O H.R.M.;

d) Xannaanada iyo anshaxa shaqaalaha Dawladda Hoose;

r) Wax alla wixii kale ee Guddiga maamulka ee Degmada ama Isuduwaha Dawladaha Hoose iyo Wasaaraddu ay u xilsaartay.

Qodobka 5aad

Qodobka 2aad ee sharciga lambarkiisu yahay 21 ee 3.2.1977 waxaa lagu kordhiyey lambar saddexaad oo qoraya:

(3 Wasiirka Dawladaha Hoose iyo Horumrinta Miyiga wuyiga wuxuu ku leeyahay Guddiyada Maamulka Gobollada iyo Degmooyinka awoodda ilaalinta (Vigilanza) gudashada xilkooda.

Qodobka 6aad

Tirtirid

Sharci ama awaamiir sharci kasta oo sharcigan ka soo horjeeda ama aan la socon karin waa la tirtiray.

Qodobka 7aad

Sharcigani wuxuu dhaqan gelayaa markuu saxiixo Jaalle Madaxweynaha J.D.S.

Muqdisho, 10 Mag. 1979

(Jaalle Maxamed Siyaad Barre)

Madaxweynaha J.D.S. Sax. S/Gaas Maxamed Siyaad Barre

## MAXKAMADDA GOBOLKA HIIRAAN

MARKEEY, aragtay arjigii uu soo qortay Axmed Yuusuf Ciise, ninkaas markeey ogaatay waxaa uu ku saabsanyahay arjigaas, markeey aragtay caddaynta Bangiga Ganacsiga Ummadda laanta B/weyne, kuwaas oo soo qoray warqada L. 00050 taariikh 18.3.1979, markeey aragtay Qodobka 69 ee soo baxay 9.9.1965.

### WAXAY CADDAYSAY

Lumida buuga keydka ee L. LR. 2339, ee ay ku qorantahay SHS. 25.365/= kana lumay Jaalle Axmed Yuusuf Ciise.

### WAXAY AMREEYSAA

Markii amarka lagu faafiyo Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda in ninkaas loo sameeyo Buug cusub ee ah kii lumay bedelkiisi mudo 30 maalmood gudohood, ah waxaa kale oo laga codsanayaa kadib markii la sameeyo buugaas in gacanta laga saaro ninkaas iska leh ee kor ku xusan.

Beledweyne, 15. 4. 1979

GUDOOMIYAHA MAXKAMADDA G. H.

Yuusuf Xaaji Cabdi